



Saint Paul **BLAST OFF** TO KINDERGARTEN

Agoosto

Dugsiga Ha Laysu Diyaariyo

Layliska Xirfadaha Bishaan

• Ilmahaaga u hambayaley marka ay muujiyaan dabeecad fiican, isticmaaln hadallo wanaagsan, iyo dadka ay si fiican ula macaamilaan. Marka ay bilaabayaan dugsiga barbaarinta, caruur badan ayaa muujiya dhaqan wanaagsan oo si fiican oo adaab leh ula dhaqma caruurta kale iyo dakda waaweyn.

Hawlaha

• Ha abuur cayaar lagu isticmaalayo ereyo fiican. Hawshan waa siyaabo aad u fiican ee lagu baranayo xirfadaha erayada iyo xitaa ka sheekeynta sheeko xariirooyinka.

1) Kaarar ku qor erayada “fadlan” iyo “mahadsanid”.

2) Kaararka kale ku qor magacyada dad kale ee gurigaaga deggan ama ay ilmahaaga maalin kasta arkaan sida waalidka iyo walaalaha. Ama kuwo kale, waxa aad qortaa dad ay ilmahaaga marmar la kulmaan, sida shaqaalaha dukaanka, shaqaalaha maktabadda, ama xubno kale ee reerkaaga ah.

3) Waxa aad “kaararka dadka” isugu geysa hal meel oo ilmahaaga u sheeg in mid ay ka doorto oo ayada u sheeg adaabta fiican ay qofkaasi u muujisay ama ay u muujin doonto mustabalka dambe. Tusaale, ilmahaaga kaarka laysu geeyay waxa ay ka dooranaysaa “kaalisada xafiiska dhakhtarka ka shaqaysa”. Waxa ay soo xasuusatay mar ay kaalisada weydiisatay sawirrada koollada leh ayada oo isticmaalaysa “fadlan”, ama in ay kaalisada ay ku oran karto “mahadsanid” sida wanaagsan ay u so dhoweysay marka xigta ay dhakhtarka aadi doonto.

• Dabeecado fiican ee ku dayasho leh ilmahaaga u samee adiga oo laf ahaantaada hubsada in la isticmaalo erayo fiican iyo hadallo wanaagsan, sida “fadlan” iyo “mahadsanid”.

• Gurigaaga ha laga abuur Bokiska Dabecadda Fiican ayadoo duleel lo sameeyo bokiska korkiisa. Maalin kasta, toddobaadkiiba mar, ama inta jeeer ee aad doorataan, xubanaha reerka weydiista in ay warqad ku qoraan sida ay xubnaha kale ee qoyska ay adaab fiican u muujiyeen, ay wax u caawiyeen, iyo lagu arkay dhaqan wanaagsan. Toddobaadkiiba mar, qofkasta qofka kale kor ha ugu akhriyo.

• Ilmahaaga kala hadal micnaha ay leedahay in dadka kale si fiican loola cayaaro. Kala hadal siyaabaha dadka lala macaamilo.

Buugagga Caruurta Buugag dheeraad waxa laga helaa shabakadda internetka www.blastofftok.org

- *Please Say Please!: A Penguin's Guide to Manners* ay qortay Margery Cuyler
- *Excuse Me!* ay qortay Lisa Kopelke
- *Rude Mule* ay qortay Pamela Duncan Edwards

Buugagga Waalidka Buugag dheeraad waxa laga helaa shabakadda internetka www.blastofftok.org

Akhris Ha Laysku Diyaariyo

Layliska Xirfadaha Bishaan

• Ilmahaaga u samee wakhti khaas ee wadaagidda ee adiga iyo ilmahaaga. U sheeg waxa ku qoran qaybaha buugga, u sheeg waxa ay sawirrada ku saabsanyihiin, u sheeg waxa ay yihiin sawirrada buuga ku yaala, su'aalo ku saabsan waxa ay arkayaan weydii. Ilmaha jecel in ay buugagta eegaan iyo ay ka hadlaan waxa ay rabi doonaan in ay bartaan sida loo akhriyo.

Caafimaadka Ha Laga Qaado

Layliska Xirfadaha Bishaan

• Ilmahaaga ku caawi in uu doobto boors iyo u barto sida ammaanka leh ee loo isticmaalayo. Boorsooyinka aad uculus amaa duqobay ama si qaldan loo qaato waxa ay ilmaha u keeni karaan dhibaatooyin, sida dhabar xanuun, qor xanuun, iyo garabyo xanuun, iyo xita dhibatoyin ku saabsan sida uu qofka u dhisanyahay.